Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
GolahaShacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kalfadhiga 7-aad kulankiisa:7-aad Tr:11.11.2015

Kalfadhiga 7-aad
Kulankiisa:7-aad, Sacada furitanka.11:52 gh, Sacada Xiritanka.1:53 gd.
Guntinta:142 xildhibaan

Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Dooda Darbiga Kenya ay ka Dhistay Gudaha Soomaaliya**
4. **Doodda Hindise Sharciyeedka Iibka,Qandaraasyada iyo Dheef Wadaaga Qaranka**
5. **Qaybinta Hindise Sharciyeedka Maareynta Shidaalka.**

Shir-Guddoomiye, ku xigeenka 1-aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka S.
Mudane:Jeylani Nuur Iikar.

1.Waxaa shirka Furay Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya Mudane:Jeylani Nuur Iikar, waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uu akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka wuxuu xildhibaanada u soo jeediyay in ay ansixiyan Ajendaha xildhibaanada wey ansixiyan ajendaha.

3.Xildhibaan: Cabdulahi Jamac,wuxuu soo jeediyay, waa in Ajendaha manta laga hadla Darbi Ga Kenya ay ka dhistay gudaha Soomaaliya.

Xildhibaan: Maxamed Cabdi Yusuf,wuxuu sheegay, waan ku raacsanahay Xildhiban:C/lahi Arrintan Darbiga Kenya ka dhisayso gudaha soomaaliya, manta soomaaliya waxey mareysa Meeshi ugu dambeysay ciidanki Kenya iyo ciidanka balad xaawo waa is hor fadhiyan waxan Dooneyna in si deg deg ah wax looga qabto anaga maheysano ciidan wax difaca lakiin niyad Ayaan heyna Masuliyada anaga iska leh waa in la gaarsiya(**Union)** yaynan noqonin Barlamaa N shabada ku dhacday.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay, arrintas guddi ayaa loo xilsaray wan ku dareyna

Ajendaha manta si xildhibaanada uga hadlan Dooda Darbiga,waa in laga soo dhiga kow lana Qeybiya hada,waa in la soo qora xildhibaanada ka doodaya arrintan.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi Cabdulahi,wuxuu sheegay,Wasiirka Arrimaha Dibada iyo Wasiir ka Arrimaha Gudaha waa in loo yeera oo halkan la kena anagoo nool oo joogna ayaa dalkena Kenya iska maamulaneysa,Darbigan wuxuu soo galay dhulka soomaaliya **Balad Xaawo,taso** Ay ugu goleeyihiin in badda ay qeyb ka qatan iyadoo xudduda badda laga qiyas qaato xudduda Dhulka sidaa daraadeed waa in aan arrinkaas diidna shacabkana uu kaco mudaharad sameyn Waa in Dacwadeena aan gaarsiina **UN, Maxkamada Aduunka iyo Urur Goboleedka IGAD** Shacabka Balad Xaawo waa soo qeylinaya waa wajib in aan ka hadalno Difacano Dhulkena Hadii dhulka la sharciyeysto wuxuu sahlaya in xudduda badda halka ay ka rabaan u sharciyobo Reer hebel dhulkooda ha difacdan aan ka baxno ee Qaranimo aan u difacano Dhulkeena soom Aaliya ha xorowdo Soomaaliyay Toosoo.

Xildhibaan:Nuur Faarax,wuxuu soo jeediyay,waxaan aad u soo dhaweynaya Xildhi:Cabdi Xaashi, arrintan maaha mid nagu cusub xudduud la sameyay lix dameyadii ay dhigeen dowladi Hi hore ee gumeysta yasha xudduudii iyo calamadihii ay dhigeen ayaa shalay laga saaray,waxay Bilaaban in ay darbiga ka dhisaan xudduda halka ay ayaga raban si qiyaas looga qato xudduda Badda shacabka Balad Xaawo wey kacan wayna is hortagen,Guddoomiyaha Balad Xawo Wuxuu sheegay in Ciidamo malatari oo Kenyan ah la soo dhoobay xudduda ayna raban in ay Xog Ku dhisan halka ay raban xudduda cusub in ay noqoto si badda xudduudeeda looga qiyaas Qaato waa in loo yera Wasiirka Arrimaha Dibada iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Wasiirka Gaashan Dhiga lana wareysta arrintaas dhulkena,baddana, cirkena,waa lama tabtan.

Xildhibaan:Cabdulahi Jamac,wuxuu sheegay,arrintan waa mid deg deg ah qaraaro ayay Gareen Barlamaankan iyo kii hore waana lagu tuntay,Barlamaankan malahan ilko wax lagu qaniino aaway Wasaaradda Arrimaha Dibada iyo Wasaaradda Arrimaha Guddaha waa in la keenaa Barlamaanka,laguma xad gudbi karo xudduudeena iyo baddeena waa in ay ka hadasha Xukuumada hadii ay ka hadli weydo, waxaan leenahay xukuumad ma heyno.

Xildhibaan:Cabdi Wahaab Ca/laahi Cali,wuxuu soo jeediyay,waa inaynu ka hadalna dhibatada meesha ka jirta, wadankeena hada lama qabsan waa hore ayaa la qabsaday,waxaa naloo keenay calankeeni oo la masaxay bad iyo bari meel inoo fayow majirto,soomaaliyay dalka waa la heysta in wax leysu qariyo mahan arrinta meesha aynu ka hadleynu way ka fog ta Hay markii la doortay Xukuumada Cumar C/rashiid,ayay nagu bilabatay arrintan, isagoo jooga dalka Kenya ayaa la dhisayay darbigan aynu la xisaabtano Madaxweynaha,Rai'sal wasaraha, iyo Guddoomiyaha Barlamaanka, soomaaliyay fadhiga ka kaca.

Xildhibaan:Caasho Koos,waxey soo jeedisay, Barlamaanka waa in uu kaco teeda kale waa in loo yeero Rais'al wasaaraha oo wax laga weydiiya arrintan ku sabsan Darbiga la dhisayo.

Xildhibaan:Cusmaan Xaaji Cali,wuxuu soo jeediyay,Ciidanka Kenya markii ay imanaysay dalkana sanadki 2011 wan ognahay qilaafka ka dhexdhacay Madaxweynihii iyo Rais'al Wasaarihi waaga jiray wax caqli gal ah mahan in Rais'al wasaare maraya Kenya in xuduudisa dhulka la boobo oo la dhisto isla markana uusan ka hadlin, xuduud benadka Kenya ay

sameysanayso wuxuu noqon doona midkii soomaaliya mideyn lahaa, digniin dowlada Kenya waxan dhahaya riyada beenta ka baxa taako dhul soomaaliyeed kuma darsan kartan.

Xildhibaan:Duniya Maxamed Cali,waxay soo jeedisay, Dowladii Aadan Cabdulle Osmaan waxaa la yiri ha la bedelo calanka waa la diiday oo la yiri badali meyno waxa la sameyay calanka sanadki 12 Oct 1954 tii qoladii soo jeedisay waa lagu diiday, hada waxaa naloo kenay calankena oo dhinac ka go'an Allah Akbar.

Xildhibaan: Jaamac Oday,wuxuu sheegay,Kenya hadii ay wax dhaceyso way dhunsan yihiin wayo anagaa tiro badan,marka hore aynu u yerno Wasiirka Arrimaha Dibada iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha ka dibna qaraar aynu soo saarno, kadibna Raisal Wasaaraha an u yeerno,waxa macquul ahayn Rai'sal wasaaraha Kenya ayuu jooga gidaarkiina waa la dhisanaya kamana hadlayo xukuumada iyada ku shaqaleh arrimahas.

Xildhibaan: **C/laahi Goodax Bare**,wuxuu soo jeediyay, xildhibaanada manta ku soo daray ajendaha wey mahadsan yihiin,waxaan kalo u mahadcelinaya shacabka balad xaawo ayagoo muujiyay geesinimo ayagoo is hor tagay dhismihii ay dhisanayen dowlada Kenya, waxay tahay tijabo ay tijabineyso soomaaliya, in ayna citirafsanan dowlada soomaaliya Barlamaanka wuxuu Soo saray qaraar waqtigena waxaan ku luminay wax aan jirin, hada ka hor Guddoomiyaha markii kalfadhiga la xirayay waxa uu na yiri waxaan ka shaqeyn doona Dastuurka, anaga Guddoomiye Barlamaan ayaan u dooranay, Guddoomiye majiro, xukuumad ma jirto, xuduudina ilaashada dagaalama,haday xukuumad jirto ha bilaaban dib u eegis xiriirka aan la lenahay Kenya go'aan cad Barlamaanka hala horkeno.

Xildhibaan: C/qaadir Cabdi Xaashi,wuxuu sheegey,maamulka Balad xaawo iyo shacabka degan oo arintan nala soo socodsiyay wey mahadsanyihiin,Barlamaanka sidiisa waa la xisaabtan, Hay'ada fulinta dowlada waxaa qabilsan xukuumada in aynaan ka hor tagin wax la aqbali karo maahan,shacabka yaan niyada laga jabin, waxaa nahay dad jira oo dowlad ah waa in xukuumada loo yeera.

Xildhibaan:Maxamed Aamiin, wuxuu soo jeediyay,an iska joojino caadifada oo si miyir leh oo miisaman xalad kasto ha lagu qiimeyo, waxaan ognahay qaraar Barlamaankii KMG ahaa uu ka gaaray arrintan qaraarkas halka uu ku dambeya aan baarno hadii uu gaabis jiro cidii ka gabisay an ogaano, haddaba cida ku shaqada leh arrintan si Dastuuri ah haloogu yero sida Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda arrimaha Dibada,,Wasaaradda Gaashan dhiga, ka dibna cidii ka sii sareysa su'aasha an weydino, waxaa weye Ra'isal Wasaaraha markii hore uu joogay ay arrintan soo shaac baxday ka dibna wey istagtay, hadana markii uu soo noqday mar labaad ayay soo cusboonatay, muxuu lug ah uu ku leyahay waa in xukuumada ay hadasho, hadaba doodan ha noqoto mid fure u ah isbedal dhab ah in uu ka yimaado sadexda hay'adood ee dalka.

Xildhibaan:Sheekh Shaacir,wuxuu sheegay,Barlamaanka soomaaliya horay ayuu u diiday dowladaha dariska ah in ciidamadooda la keeno,waxa laga baqayayna waa arinta manta jirto, mar maahan labo maahan oo ay sameysay dhaqdhaqaaq,waxaan codsan lahaa safiirkeena fadhiya dalka Kenya in 24saac gudahooda uu ku soo galo dalka, in 48saac gudahooda ciidamadooda ay u celiyaan halka ay fadhiyeen, tan waxaan u arkaa dan-daansi.

Xildhibaan:C/laahi Axmed Coonka,wuxuu soo jeediyay,xildhibaanadii hortay hadashay wan ku raacsanahay fikirkooda, Kenya waxay wado waa dandansi hadaba safiirkena 24saac an la soo noqono ka dibna waa in guddi loo xilsaro iyadoo ciidamada Kenya xuduuda ayna ka qaadin yan wada hadal lala galin Kenya, caalamka manta waxaa jira shacab ku dagaalamo midiyo iyo dhagax anagana waan difaaci karnaa wadankeena.

Xildhibaan:Cabdi Bare,wuxuu sheegay,ciidan soomaaliyeed oo la dhiso maxaa loo wayay,teda kale Kenya iyo itoobiya goor man walaalo noqonay waligen cadow bay noo ahaayen,maamul goboleedyada oo dhan waxey yiraahdan dowladaha dariska ah ee aan walaalaha nahay,Barlam aanka waa in uu masu'liyadiisa qaata uu la xisaabtama cid walba Barlamaan aan miciyo yelano.

Xildhibaan:Sheekh Aadan Madoobe,wuxuu soo jeediyay,arrintaan mahan mid sahlan waa in masu'liyad leyska saaro,hada ka hor ayaan dowlada Kenya kala hadlay oo aan dhahay waxaan xornimada aan qadanay 1960kii idinkana waxad qaadatan 1963dii ilaa iyo waqtigaas xuduudana waa cayineed, hada maxaad xuduuda u soo xusuusateen mase bur-burkii nagu dhacay ayaad ka fai'deysaneysan, markaas wixii ka dambeyay wey ka joogsadeen, hadana hada waa soo cusboonaysiiyan, mana sameyn in ay dowlada soomaaliya u wacdo oo ay dhahdo ila fiiri xadkeyga waa xiranayaa,waxaa cad dad masu'liyiin ah in ay Kenya ku garab siinayso waa in aan iska qabanaa dadkaas.

Xildhibaan:Siciid,wuxuu sheegay, waxaan la soconaa Kenya in ay geysatay maxkamada caalam iga dacwo hadana ay la soo noqotay,waxay tiri waan-waan ayaan la galaya,IGAD waxey ka shaqeysa sida dowlad goboleedyada u qeybin lahayd haka wan towdo dibna ha ugu fiirsato, waxaa nalooga fai'deysanaya tafaraaruqa wixii dhiig lahow kac waxaan Kenya leenahay ha isku dayin in aad dhul soomaaliyeed haysato.

Xildhibaan:Daahir Amiin Jeesow,wuxuu soo jeediyay,Kenya qorshaheeda waa mid fog shalay waxaan la ku lanay Wasiirka Arrimaha Guddaha, walina hadalkii waa noo socda,Kenya meel aan soomaali laga taaban ayay ka taabatay, in aan nirahno ciidamadaada waxey noo difacayan Jubba land, hadana aan nirahno waa naboobeysan waa arrimo is qilaafayo,waxaa jira masu'liyin oo arintaas hoosaasinaya oo dantooda gaarka ah wata, hadaba Kenya waa in aan u qaadana cadow, soona saarna qaraar ciidamadeeda looga sarayo dhulka soomaaliya ka dibna wada hadal la galnaa hadii ay maqli waayan in aan la dagaalano.

Xildhibaan:Maryan Cariif Qaasim,waxey sheegtay,Barlamaanka waan u hambalyeynayaa iyo Guddoomiye Jeylaani Nuur,Bad, iyo Bari anaga aan leenahay in nalagu qabsado mayeelayno cid aan kala xaajoonayno malahan, soomaaliyey kaca oo istaaga dhulka iyo xuduuda soomaaliya calaamad ayay leeyihiin ayagana la raba in la bur buriyo, dhismahaas si deg deg ha loo joojiyo.

Xildhibaan: Maxamuud Cali Dhuux,wuxuu soo jeediyay, ka hadalka xuduuda waa muqadas darbigaan beenta ah ee dowlada Kenya wada ma noqon doonto xuduud dhab ah mana noqonaya mid meel mara,waxaa waajib nagu ah in aan la xisaab tano dadka masu'liyadaas leh wararkeena idaacada lagama sii dayo oo lama rabo in xaqiiqada la ogaado, dowlada Kenya waxan dhahaya labada shacbi colaad ha dhax dhigin ee ka waan tooba xuduuda aad dhisaysan.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,waad ku mahad santihiin sida sharafta leh ee aad ugu hadasheen 209kii Barlamaankii KMG waa ka hadlay Qaraarna waa ka soo saaray

Madaxweynahana waa uu saxiixay waa sharciyoobay qaraarkaas waxaa maqan dabagal,hadii la waayo in qaraar la fulin waayo ka gudub oo sharci ka keena aan sharciyayno,waxaa ugu wacan kartidii wasiirkii ay qusaysay hadii uu wax qaban wayo xilka ayaad ka qaadaysan.

Kalfadhiga 7-aad Kulankiisa:7-aad, uu Shir Gudoominayay, Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur Iikar, uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:53 gd.